



Federal Republic of Somalia
Office of the President

SHARCI Lr. 20

TAARIKH: 27/06/2016

WAX KA BEDDELID DASTUURKA KMG

MADAXWAYNAHA J.F.S

- MARKUU ARKAY:** Qodobka 87aad, Farqadda 1aad, Xarafka 'C' iyo Farqadda 2aad ee Dastuurka J.F.S.
- MARKUU ARKAY:** Qodobada 136aad, Faqraddiisa 2aad ee Dastuurka J.F.S
- MARKUU ARKAY:** Warqadda Guddoonka Golaha Shacabka Lr. 1316/3/9/16 ee 15/06/2016 kuna saabsan Ansaxinta wax ka badalka Qodobada 60aad iyo 136aad ee Dastuurka J.F.S.
- MARKUU TIXGELIYAY:** Baahida loo qabo in aysan dhicin maqnaansho hay'ad siyaasadeed inta laga dhisaayo tii badali lahayd go'aanka dib u dhigista Aftida Qaranka.

Waxuu Madaxweynaha soo saaray Xeerkaan:

Qodobka 1aad

Laga bilaabo marka uu Madaxwaynuhu saxixo, waxaa la oggolaadaan ansaxinta Golaha Shacabka ee ku saabsan wax ka beddelid Qodobada 60aad iyo 136aad ee Dastuurka KMG


Qodobka. 2aad

Waxaa muddada Xilka Golaha Shacabka ku egtayah marka la dhiso Golaha Shacabka Badali lahaa

Qodobka.4aad

Waxuu Xeerkaan Dhaqangelayaa isla maalinta uu Madaxwaynaha J.F.S saxiixo waxaa la baabi'yay sharci iyo xeer kasto ee ka soo horjeedo waxaana lagu soo daabici doonaa Faafinta Rasmiga ee J.F.S.

Muqdisho 27/06/2016


Madaxwaynaha J. F. S.
Xasan Sheikh Maxamuud



Ref: ١٣٦ /٣/١٩/١٦

Mogadishu, 15th June 2016 التاریخ

Ku: Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Ku: R/Wasaaraha Xukuumadda Federaalka Soomaaliya
Muqdisho.

Og: Garyaqaanka Guud ee Dawladda.
Muqdisho.

Og: Xoghayaha Guud ee Golaha Shacabka
L/H. Golaha Shacabka.

Ujeeddo: Ansixinta Sharciga Wax-ka-beddelid Dastuur

M.ne Madaxweyne;

Waxaan kugu wargelinaya inuu Golaha Shacabka Jumhuuriyadda Federaalka Soomaaliya go'aan ka gaaray ansixinta Sharciga Wax-ka-beddelid Dastuur oo halkan ku lifaaqan, wuxuu Golaha Shacabka Kalfadhiga 8aad ee Fadhligiisii 18aad ee 15^{ka} Juun 2016 oo ka dhacay Xaruntiisa Caasimadda Jumhuuriyadda ee Muqdisho ku ansiyey cod furan oo u dhacay sidatan hoos ku xusan:

- Xildhibaan Oggolaadeen: 208 (Laba Boqol iyo Sideed) Xildhibaan.
- Xildhibaan diidey: 4 (Afar) Xildhibaan
- Xildhibaan ka aamustay 3 (Saddex) Xildhibaan.

Haddaba, M.ne Madaxweyne waxaan si waafaqsan Qodobka 90-aad xarafka (f) ee Dastuurka JFS kaaga codsanaynaa in aad go'aanka Golaha ku oggolaato Xeer-Madaxweyne, si uu Sharci u noqdo looguna soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Dawladda si waafaqsan Qodobbada 84-aad iyo 85-aad ee Dastuurka JFS.

Anigoo huba in waajibkaaga Dastuuriga aad ka gudan doonto, waxaad magaca Golaha Shacabka nooga guddontaa salaan diiran iyo qaddarin gaar ah.

M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaani"
Guddoomiyaha Golaha Shacabka



Tell: +252 612224442 / +252 615577472


E-mail: speaker@sfp.so

Website: www.sfp.so

**ANSIXINTA SHARCIGA WAX-KA-BEDDELID
DASTUUR.**

Guddoomiyaha Baarlamaanka JFS


Tirada Xubnaha Codeysay 215: Oggol (208) Diidmo (4) ka aamustay (3)



Saxiix: M.ne Muxammad Sh. Cusmaan "Jawaari"

Taariikh: 15th June 2016


Guddoomiye ku-xigeenka 1aad- Baarlamaanka JFS




Saxiix: M.ne Jeylaani Nuur Iikar

Taariikh: 15th June 2016

Guddoomiye ku-xigeenka 2aad- Baarlamaanka JFS



Saxiix: M.ne Mahad Cabdalla Cawad



Taariikh: 15th June 2016



Jamhuuriyadda Federaalka Soomaaliya

SHARCIGA WAX-KA-BEDDELID DASTUUR

Garwaaqsi:

Ayadoo la tixgelinaayo xaaladda siyaasadeed iyo amni uu dalka ku sugan yahay, sharcigan wuxuu dib u dhigaya qabashada aftida qaran ee sida kama dambaysta ah loogu ansixinayo Dastuurka oo lagu sameeyey dib-u-eegista

Hadaba si loo suurtogeliyo in kalaguurka muddada xilhaynta Baarlamaanka 9-aad looga gudbo xilqaamidda Baarlamaanka 10-aad kuna hirgasha nabad iyo xasillooni siyaasadeed ku dheehan, waxaa Baarlamaanka Federaalka laga codsanayaa:

- a. In uu wax ka beddel dastuureed sameeyo oo Qodobka 136aad Faqradiisa 2aad buriyo si dalkaa looga badbaadiyo inuusan gelin marxalad dastuur la'aan, dibna loo dhigo qabashada aftida Qaranka;
- b. In muddada xilheynta Baarlamaanka Federaalka si cad loo qeexo si dalka looga badbaadiyo inay ku timaado firaaq jiritaanka hay'adaha Dowladda.

Sharci Lam. _____ ee _____

Cinwaanka: Sharciga wax-ka-beddelid Dastuur

BAARLAMAANKA FEDERAALKA SOOMAALIYA:

Markuu Qaddariyey: In ay lagama maarmaan tahay in muddada kalaguurka u dhexeeysa dhammaadka xilhaynta Baarlamaanka 9-aad iyo xilqaamidda Baarlamaanka 10-aad ee Soomaaliya looga gudbo laguna suurtogeliyo si nabad iyo xasilloni siyaasadeed ku dheehan iyo dhaqan dimuqraadiyadeed oo xor ah;

Markuu Arkay: Qdobka 63aad ee Dastuurka oo awood u siinayo wax-ka-beddelidda Dastuurka.

WUXUU ANSIXIYEY WAX-KA-BEDDELID DASTUUREED

Qdobka 1-aad

Dib-u-dhigista Qabashada Aftida Dastuurka Qaran

1. Qdobkan waxaa lagu buriyay Qdobka 136 ee Dastuurka Federaalka Faqraddiisa (2) kuna saabsan qabashada Afti Qaran si kamadambays ah loogu ansixinayo Dastuurka Federaalka.
2. Wawaana qabashada Aftidan Qarameed dib loogu dhigay lana abaabuli doona inta lagu jiro muddada xilhaynta Baarlamaanka 10-aad ee 2020.

Qdobka 2-aad

Xilhaynta Baarlamaanka Federaalka

Si aysan u dhicin firaaq ku yimaada jiritaanka hay'adaha Dawladda, sida ku cad Qdobka 60 (1) muddada xilhaynta Baarlamaanka Federaalka 9aad waa (4) sano, waxayse xilhayntiisa rasmiga ah ku eg tahay maalinta lagu dhawaaqo natijjada doorashada Baarlamaanka 10aad ee Cusub.

Qdobka 3-aad

Meelmarinta iyo Faafinta Sharcigan

Sharcigan wuxuu dhaqangalaya maalinta lagu soo saaro Faafinta Rasmiga ah ee Jumhuuriyadda, ka dib markii Baarlamaanka Federaalku anxiyo Madaxweynaha Jumhuuriyadda Federaalkana ku meelmariyo Xeer-Madaxweyne.